



## King County

Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024

# MAALGELINADA KAHORTAGGA CUNSURIYADA IYO SINNAANTA

Miisaaniyada sanadka 2023-2024 waxay si firfircoo u maalgelisaa sidii wax looga qaban lahaa waxyelada cunsuriyada iyadoo la wada abuurayo oo la hirgelinaayo dhaqamada iyo siyaasadaha u hiiliya midab takoorka. Marka laga soo tago maalgashiga cusub ee hoos lagu xusay, King County waxa ay sii wadi doontaa barnaamijyada muhiimka ah ee lagu aasaasay miisaaniyada 2021-2022 si loo hormariyo sinnaanta iyo caddaalada jinsiyada iyo bulshada.

### Yool saarista meelaha baahiyaha ugu badan ka jiraan

- Hubi in deeqaha iyo maalgelinta dhammaan qaybaha miisaaniyadu ay mudnaanta siinayaan bulshooyinka iyo dadwaynaha leh baahiyaha ugu badan. Adigoo diirada saaraya bulshooyinka aan helin fursadaha badan, helida adeegyada, iyo cadaalada, King County waxay si fiican ula kulmi doontaa Waqooyigeeda runta ah si ay u noqoto bulsho soo dhaweyn leh oo qof walba uu hormar ku sameyn karo.

### La shaqeynta bulshada

- Maalgelinta miisaaniyada ka qaybqaadashada:** \$10 milyan oo loogu talagalay wareega labaad ee miisaaniyada ka qaybqaadashada ee dadka degan meelaha ka baxsan King County. Wareegii koobaad ee miisaaniyada ka qaybqaadashada wuxu kusoo dhamaaday si guul ah bishii Agoosto 2022, iyadoo dadka deegaanka ay doorteen 45 mashruuc oo waaweyn si ay u maalgeliyan bulshadooda.
- Taageerida ka qaybgalka bulshada iyo gacan ka geysashada:** \$710,000 oo loogu talagalay in lagu bixiyo taageerada joogtada ah ee kooxda wada shaqaynta bulshada ee u janjeedha sinnaanta iyo kahortagga cunsuriyada, oo sidoo kale abuurta fursadaha bulshada si ay uga qaybqaataan maamul hufan oo lala xisaabtami karo iyadoo loo marayo kooxaha sida King County Equity Cabinet, Racism is a Public Health Crisis Gathering Collaborative, iyo Coalition Against Hate and Bias.
- Iskaashiga la xariira caddaalada cimilada:** \$460,000 oo loogu talagalay Climate Equity Task Force (Kooxda Hirgelinta Sinnaanta Cimilada) ee taageerta ka jawaab celinta arrimaha la xariira cadaalada cimilada ee bulshada.

### Wax ka badelka nidaamka sharciga dembiyada

- Meesha ka saarista dembiyada daroogada:** \$2 milyan oo loogu talagalay in la siiyo kooxaha bulshada si loo dhiso wacyigelin ku saabsan fursadaha meesha looga saaraayo dembiyada daroogada iyo bixinta adeegyo wax ka qabta baahiyaha shakhsiyadka ay saameeyeen iyo cawaqaqib xumada ka dhalanaysa ee xiriirkka la leh nidaamka dembiyada iyo xukunada daroogada, sida caqabadaha joogtada ah ee la xariira guryaha iyo shaqada.
- Kahortaga rabshadaha ka dhasha hubka:** \$9 milyan oo lagu taageeraayo Regional Peacekeepers Collective, Ergo la aamin karo oo gudbinaaya habka ay bulshadu u hoggaaminayo oo lagaga hortagayo rabshadaha ka dhasha hubka oo ay kujiraan ka jawaab celinta dhacdooyinka muhiimka ah, gudbinta ku saleysan isbitaalka, iyo hawlaha dib u habeynta meelaha kulul.
- Taageerida barnaamijyada Bulshada ee ay bulshadu hogaamiso:** \$11.9 milyan oo loogu talagalay sidii loo sii wadi lahaa barnaamijka Restorative Community Pathways (Dariiqooyinka guusha Bulshada ee Soo celinta) iyo Community Diversion Program (Barnaamijka Weecinta Bulshada) si loo bixiyo isla xisaabtan ku saleysan adeegyada bulshada iyo dhalinyarada iyo dadka waaweyn ee ka baxsan nidaamka maxkamada.

### Kor u qaadista awooda degmada King County si ay u hirgaliso u hiilinta sinaanta/cunsuriyada

- Kordhinta adeegyada turjumaada:** \$1.7 milyan oo loogu talagalay sidii loo hormarin lahaa sinnaanta luuqada, oo ay kujirto balaarinta turjumaada webseedyada King County.
- Kordhinta awooda gudaha:** \$4.8 milyan oo loogu talagalay sidii loo dhisi lahaa awooda ururka gudaha ee King County ee u janjeerta sinnaanta, jinsiyada, iyo shaqada caddaaladda bulshada, oo ay kujirto siinta tababaro dheeraad ah oo la siiyo shaqaalah, hormarinta awooda ka qaybgalka bulshada iyo abuurista ururada bulshada ku salaysan, iyo hormarinta xeeladaha si loo hormariyo caddaalada naafada.

**Su'aalo ma qabtaa?** La xariir kcexec@kingcounty.gov.